



## Imtixaannada MCA & MTAS ee 2022-23

Gu' walba, imtixaannada Minnesota Comprehensive Assessments (MCA) ama midka Minnesota Test of Academic Skills (MTAS) ayaa lagu siiyaa ardayda maaddooyinka xisaabta (fasallada 3-8 iyo 11), akhrinta (fasallada 3-8 iyo 10), iyo sayniska (fasallada 5, 8 iyo dugsigga sare markay maaddada bayoolojiga dhammeeyaan). Inta badan ardaydu waxay qaataan imtixaanka MCA; misana ardayda qaar ee hela adeegyada waxbarashada gaarka ah kuwaasoo buuxiyay shuruudaha u-qalmiinta waxay qaataan imtixaanka MTAS. Labada imtixaanka waxay bixiyaan xogo ku saabsan waxbarashada ardayga iyo heerka uu ka joogo fasalkiisa qaasatan akhriska, xisaabta, iyo sayniska. Imtixaannada MCA iyo MTAS waxaa loo adeegsadaa in la buuxiyo shuruudaha sharci-dejiyaasha federaalka iyo gobolka. Imtixaannada waxaa la bixiyaa sannad walba si loo cabbiro waxbarashadda ardayga marka loo eego heerarka tacliimeed ee Minnesota (Minnesota Academic Standards) kuwaasoo muujinaya waxa ardayda fasalka ay dhigtaan ka barten isla markaana ay awoodaan inay sameeyaan.

Ardaydu waxay qaadan doonaan imtixaannada MCA ama MTAS inta u dhaxaysa March 6 iyo May 5, 2023. Haddii aad doorbidaysid in ardaygaagu uusan ka qayb galin imtixaannadan isku jaan-go'an heer gobol, fadlan u sheeg maamulaha ardaygaaga go'aankaagaas adigoo siinaya warqad qoraal ah ama buuxinayo foomka diidmada imtixaanka ee la dhaho MDE Parent/Guardian Participation Guide and Refusal Form.

Wixii xog dheeraad ah ee ku saabsan imtixaannada MCA, MTAS iyo foomka diidmada imtixaanka ee MDE Parent/Guardian Participation Guide and Refusal Form, fadlan gal:

- Bogga Xogta Imtixaanka ee Qoysaska SPPS loogu Tala galay: [spps.org/Page/33916](https://spps.org/Page/33916)
- Bogga Xogta Imtixaanka ee Qoysaska loogu Tala galay ee Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota (MDE): [education.mn.gov/MDE/fam/tests/](https://education.mn.gov/MDE/fam/tests/)

Fadlan la xiriir iskoolka ardaygaaga haddaad wax su'aalo ah qabtid.